

# KHARIIDADA HORUMARKA

Ka waalidiin ahaan, waxaan doonaynaa in carruurteenu wax bartaan ayna ku wanaagsanaadaan dugsiga. Hase ahaatee, haddii aadan dugsiga tegin ilaa tobaneeyo ama labaataneeyo sano, wax badan ayaa iska badalay wixii aad xusuusnayd. Wax-barashada maanta macnaheedu maahan miiska iyo kursiga oo la fariisto, akhrinta buuggagta wax laga barto, ama ka koobi-garaynta sabuuradda. Carruurtu, waxay in badan ka qaybgalaan 'samaynta waxyaalaha', taas oo ah sababta keliya eegidda buuggagtooda inaysan kaaga sheegayn wax badan oo ku saabsan waxbaridda iyo barashada oo dhan ee dhacday. Barashada nashaadyada, sida shaqo iskaashi ah, howlaha xallinta mashaakilka, su'aalidda iyo ka jawaabidda su'aalaha iyo ku-shaqaynta fikradaha cusub, waxaa badanaa loo isticmaalay waxbarashada fasallada. Barashadu waxay kaloo ka dhacdaa dibadda fasalka ee u safridda cayaaraha, kaambooyinka, miyuusamyada iyo gurigaba.

## Wax kasta oo dhacay ila imtixaanka?

Imtixaannadu waxay ka mid yihiin hababka lagu ogaan karo siday u wacan tahay horumarka ay carruurtu samaynayaan, hase ahaatee, barayaasha waxaa laga yaabaa inay habab kale u adeegsadaan arintan, gaar ahaan, dugsiyada hoose iyo dhexe.

Inta sannad-dugsiyeedka lagu jiro, barahu wuxuu adeegsan karaa:

- qiimaynta isku-faca
- qiimaynta nafsaaniga
- shaqo kooxeed
- niqaash kooxeed
- shaqo mashruuceed
- galka faylasha
- imtixaano.

Noocyadan nashaadyada waxbarashada waxaa hadda isticmaala barayaasha wax ka dhiga fasallada hoose iyo dhexe si loo eego sida ardaygu ugu fiican yahay inuu fahmo xirfadaha ama aqoonta lays baray. Ma jiraan wax la yiraahdo helidda wax ka badan boqolkiiba 50 ama buundada laga bilaabo A ilaa E. Calaa kulli xaal maxay runtii la macno tahay boqolkiiba 51?

## Sida loogu caawiyo carruurtaaada inay wax bartaan

- waqti la qaado ayaga
- kala hadal ayaga wax ku saabsan waxyaalaha
- ku-dhiirigeli ayaga inay waxa ugu fiican sameeyaan
- ogaanshaha waxay ku fiican yihiin, iyo waxay xiiseeyaan
- xiisaynta waxyaalaha ay ku fiican yihiin
- sida badan wax la akhri ayaga, kala hadal wax ku saabsan buuggagta
- guriga ku sii masuuliyadaha ku habboon
- u dir ayaga inay waxyaalaha kuu keenaan
- weydii ayaga fikradahooda ku saabsan waxyaalaha
- lahow ka fillasho sare oo macquul ah
- ahow mid xiiso u qaba wax-barashadooda
- ka filo inay aadaan dugsiga maalin kasta
- si dhab ah u rumaysnow inay si fiican wax u-qaban karaan ayagu
- iska ilaali inaad barbardhigto carruuraha kale.